



Hagida Dib u furida

Qaybta: Tafaariiqda

Hagitaan Gaar ah oo loogu talagalay Dukaamada tafaariiqda:

## Dukaamada tafaariiqda ayaa looga baahan yahay inay:

- Dib u eegida iyo fullinta [Hagida Guud oo Badrooniya](#).
- Xaddidaan tirada macaamiisha ee ku jira dukaanka tafaariiqda ayna saaraan diirada joogteynta masafo ah ugu yaraan lix (6) fuud oo u dhaxaysa dadka iyo shaqaalaha dukaanka. Maamulka dukaanka waa inay go'aamiyaan dadka ugu badan ee ku jira kara dukaanka si loo joogteeyo kala fogaanshaha jireed oo ah ugu yaraan lix (6) fuud, iyadoo la tixgelinayo aagagga dukaanka ee dadku ku badan yihiin (sida dariiqyada gudaha dukaanka ah) ayna si habboon u xaddidaan soo galida dukaanka.
- Dhejiyaan [boorka aastaamaha cad](#) (ee laga helo [healthoregon.org/coronavirus](http://healthoregon.org/coronavirus)) oo qorayo aastaamaha COVID-19, oo weydiinayo shaqaalaha iyo macaamiisha qabo aastaamaha inay joogaan guriga, oo qorayo cida lala xiriiyayo haddii ay u baahanyihiin caawin.
- Isticmaalaan calaamado si ay dadka ugu dhiirrigeliyaan kala fogaanshaha jireed.
- Si joogto ah u nadiifiyaan ugana dilaan jeermiska aaggaga shaqada, meelaha dadku ku badan yihiin, iyo sagxadaha badanaa la taabto ee aaggaga dukaanka ee macaamiisha/dadweynaha iyo aaggaga dukaanka ee shaqaalaha. Tirtir gacan-qabsiyada albaabada qolalka dhar-beddelshada, darbiyada iyo kuraasta fadhiga kadib markuu macmiil isticmaalo.
- Dib u eeg oo hirgeli, [Hagida Maaskarada, Gashaanta Wejiga, Weji Daboolka ee Dalka oo dhan ka dhaqangalay](#).

## Ilaa iyo xadka suurtoogalka ah, dukaamada tafaariiqda waa inay, laakiin loogama baahno in:

- Tixgeliyaan inay dhigaan caag la iska dhex arki karo ama muraayad horta lacag-hayeyaasha ama miisaska adeega macaamiisha, ama meelaha kale ee aadka ay u adag tahay in masafo ah lix (6) fuud loo dhaxeeyso shaqaalaha, iyo macaamiisha.
- Dhiirrigeliyaan dariiq hal dhinac ah oo calaamado ku leh irridaha laga soo galo iyo kuwa laga baxo, laakiin ha xayirin irridaha ka-bixida ee loogu talagalay xiliyada dabka jiro. Isticmaalaan calaamado lagu hago socodka oo hal dhinac ah.
- Dhulka ku dhejiyaan calaamado iyo xargo si ay u joogteeyaan kala fogaanshaha jireed marka la sugayo lacag-hayeyaasha.

- Ka mamnuucaan macaamiisha inay isku cabiraan waxyaabaha wajiga lagu xirta (maaskarooyinka dharka laga sameeyay, masarada, duubka madaxa lagu xirto, waxyaabaha indhaha lagu xirto).
- Go'aan ka gaaraan inay dib u furaan qolalka dhar isku tijaabinta. Haddii qolalka dhar isku tijaabinta dib loo furo, macaamiisha waa inay gacmaha dhaqdaan ama isticmaalaan gacmo nadiifiye kahor iyo kadib isku tijaabinta dharka. Ganacsadeyaashu dukaamada tafaariiqda waa inay siiyaan dadka gacmo nadiifiye ama ay goobo gacmo dhaqasho ka hagaajiyaan aggagaarka qolalka dhar isku tijaabinta. Ogsoonow: Ma jiraan wax ah xog saynisiyayeed oo muujineysa in walxaha dharka ka sameysan ay yihiin dariiq weyn oo uu ku faafi karo korona fayraska. Halis kasta oo ka timaadda u baylah noqoshadan waxay u badan tahay inay aad u hooseyso. Alaabada ku jirtay qolka dhar isku tijaabinta ayaa gooni loo dhigi karaa maalin ama ka badan haddii ganacsadaha dukaanka tafaariiqda ka welwelsan yahay halisyo ka imaan kara dharka ay macaamiisha isku tijaabiyeen.
- Marka ay qaadayaan alaabada la soo celiyay, shaqaalaha waa inay gacmaha dhaqdaan ama isticmaalaan gacmo nadiifiye ka hor iyo kadib taabashada alaabada. Ganacsadaha dukaanka tafaariiqda wuxuu gooni u dhigi karaa alaabada hal maalin ama ka badan haddii uu ka welwelsan yahay halisyo u baylah noqosho.
- Tixgeliyaan inay bixiyaan xulashooyinka ah in dadku ay horey u dhiiban karaan dalabkooda kadibna ay qaadan karaan marka ay alaabtu diyaar tahay, sida u galinta baabuurka haddii ay habboon tahay ayna khuseeyso.

## Ilo Dheeraad ah:

- [Calaamado aad faafin karto](#)
- [Tilmaamaha Maaskaraha, Waji Daboolashada, Weji Daboolka](#)
- [Hagista OHA ee Dadwaynaha Guud](#)
- [Hagista Guud ee OHA ee Loo-shaqeeyayaasha](#)

**Helitaanka:** Shakhsiyaadka naafada ah ama shakhsiyaadka ku hadla luuqad aan ka aheyn Ingiriis, OHA waxay ku siin kartaa dukumiintiyo qaabab kale ah sida luqadaha kale, daabacaad ballaadhan, farta indhoolayaasha ama qaab aad adigu doorbidayso. Kala xiriir Mavel Morales lambarka 1-844-882-7889, 711 TTY ama [OHA.ADAModifications@dhsosha.state.or.us](mailto:OHA.ADAModifications@dhsosha.state.or.us).